



24kii Sibtember 2009

**Midowga Yurub iyo Laanta Cuntadda & Beeraha ee Qaramadda
Midoobay oo caawinaayo 78,000 Beeraleey ah iyo Qoysas ku tabaaleeysan
magaalooyinka Soomaaliya**

Midowga Yurub iyo Laanta Cuntadda iyo Beeraha ee ee Qaramadda midowbay ee u qaabilsan Soomaaliya ayaa waxaay ku billaabeen taageero dhinacyo badan leh oo aay ku taageerayaan illaha nololeed ee reer miyiga soomaaliyeed si aay uu xakameeyaan dhibaataadda aay u geeysteen sicir bararka qiimaha aay ku iibsadaan cuntadda dadka ku dhaqan Koofurta Soomaaliya.

Mashruucaan wuxuu si toos ah u caawinayaa 78,100 oo qoys eek u dhaqan Koofurta iyo Bartama Soomaaliya isagoo diiradda saaraaya dhulbeereedka dalacadda webiyadda Shabeele iyo Juba. Mashruucaan waxaa ka faa'ideysanaa dhaqdhaqaaqiisa **beeraleeyda** iyo xoollo dhaqatadda yar yar kuwaas oo uu kor uu u qaadaayo daqligooda heerka waxsoosaarka iyo dalagyadda beeraha ka soo baxa ee suuqoodda lagu laga helaba.

Iyadoo uu la kaashanaa Urrurradda bulshadda rayadkaa iyo kuwa Caalamiga ah ee ka howl gala gobolladda Shabeeloyinka iyo Juba iyo masuuliyiinta Soomaaliyeed. Xafiiska Laanta Cuntadda iyo Beeraha Soomaliya u qaabilsan wuxuu hadafkiisu yahay inuu kobciyo waxsoosaarka beeraha iyo inuu dayactiro kaabayaashoodda isagoo isticmaalayaa lacag cadaahan dadka ka shaqeeya mashruucaan. Mashruucaan wuxuu kaloo bixinayaa tutub abbuur kala duwan , qalabka beeraha iyo bacrimin isla markaas wuxuu dayacri doonnaa kanaalladda waraabka, suuqyadda iyo jidadka ka yimaadda dhulbeereedka.

Mashruuca wuxuu kaloo ka diiradda saaraayaa qoysaska faqiirka ah ama tabarta daran ee k u dhaqan magaallooyinka kuwaas uu oo ka faa'ideysan doonno shaqooyinka uu abbuuro , sidaas darteedna uu kor u qaaddo awooddoodda dhaqaale ee aay wax ku iibsadaan.

Howsha mashruucaan wuxuu ka mid tahay tasiilaadka Cuntadda ee Midowga Yurub ee caalamiga oo labo sano kaas oo qarashkiisu yahay 1 Bilyan ee Yuuro taas oo lagu caawinayaa waddamadda aay waxyeeleeyeen sicir bararka cuntadda si aay u gaaraa isku filaanso dhinaca cuntadda.

Mashruuca waxaa hishiiskiisa la saxiixa 1da Bisha May 2009 waxayna shaqadiisu Soomaaliya ka billaabaneysaa bisha Sibtember 2009.

Hishiis Faahfaahsan

Guddiga Midowga Yurub- Qaybta ka shaqeysa Soomaaliya, Waftigga U qaabilsan Midowga Yurub ee Jamhuuriyadda Keenya. S.B. 30473 00100, Nayroobi, Keenya. Email: Somalia@ec.europa.eu Telefon: 254 20 2712830/2713250

Laanta Cuntadda & Beeraha Qaybta Soomaaliya- Ngecha Road, Off Lower Kabete Roaf, Nairobi, Kenya S. B. 30470, Nayroobi, Kenya. Email: FAO.SO@fao.org Tel: 254 20 4000 500